

Dhameystir Ku Saabsan Daraasad Ku Sameynta Khadka Gaadiidka ee Midtown

Warbixin kooban oo badhigii bisha Maajo waad heli kartaan

Waxaanu u mahad celineynaa cid kasta oo ka qeyb qaadatay vabdhigii la soo bandhigay bilowga sanadka! Dadka aad bay isugu soo baxeen labadii habeen waxayna ka dhiibteen ra'yigooda. Haddii aadan warbixintaas horey u arag, faaladii ay dadka ka bixiyeen oo la soo koobat waxa aad ka heli kartaan bogga internetka ee mashruuca, <http://www.metrotransit.org/meetings-and-events>.



Dadkii ka qeyb qaatay waxa ay tixgeliyeen fikradaha kala duwan ee la soo bandhigay bishii Maajo ee lagu qabtay Whittier Clinic.

Sadex Fikaradood Oo Kala Duwan Ayaal Isla Ogolaaday


Kooxda ka shaeyneysa mashruuca aad bay u mashquulsanaayeen xilligii kuleylaha iyaga oo ka shaqaynayey isku keenista [sadxda fikradood](#) ee la tixgelinayo. Natiijada waxaa la dhameystirayaa oo dadweynaha loo soo bandhigayaa wixii ka dambeeya deyrta soo socota, laakiin qaar badan oo ka mid ah waxyaabaha muhimka ee ku jiray talo soo jeedinta waa la isla gartay. Taas waxaa ka mid ah:

- **Xilliga Isu Socodka Gaadiidka:** Mudada uu gaadiidku ku soconayo wadada Midtown Greenway waxa ay u dhaxeysaa 13-14 daqiiqo, iyada oo gaadiidka basaska ee isla wadadaas mara ay ku qaadata 25-26 daqiiqo. Labada tiro ee halkan lagu sheegeyba waa gaadiidka u socda dhinaca bariga inta u dhaxeysa xarunta West Lake (West Lake Station) iyo wadada Lake Street/xarunta Midtown (Midtown Station).
- **Adeegga qorshaha ku jira:** Gaadiidka mara wadooyinka - ha ku socdaan wadada Lake, Midtown Greenway ama labadaba - waxa ay wadada soo marayaan 10 daqiiqo ee kasta ama si ka wanaagsan. Basaska mara wadada Lake waxa ay sii wadi doonaan in ay soo maraan 15kii daqiiqo ee kasta.
- **Wadada gaari/laba gaari is dhinac socdaan ee Midtown Greenway:** Daraasad buuxda ayaan ku sameynay Greenway waxaan khadkii midkii kaliya ahaa ka dhignay mid laba goobood ah. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in khadka intiisa uu noqonayo mid laba khad ka kooban gaadiidkuna isku jiho u socdo, ka dhaqso badan, socodkana laga kalsoonaan karo.


Fikradda ku Saleysan Xarun Loo Sameeyo oo La Isku raacay

Waxaa kale oo aan sameysnay naqshad muujineysa gaadiidka wadooyinka mara iyo xarumaha basaska istaagaan oo la wanaajiyey. Taasi waa mid muhim ah si aan ogaano kharashka ku baxaya xarumahaas una soo bandhignos ida ay munaasib ugu yihiin degaanka ku xeeran. Halkan hoose waxaa ku xusan lacada xarun ee tusaalaha loo soo qaatay.

Naqshadda xarunta Basaska ee Lake Street



Naqshadda Xarunta Midtown Greenway





Bandhigga Ugu Dambeeya oo Laga Dhigay Nofeembar

Jadwalka ku darso bandhigga ugu dambeeya ee la qabanayo deyrta:

Arbaco, 20ka Nofeembar



Intermedia Arts
[2822 Lyndale Ave S](https://www.intermediaarts.com/2822-Lyndale-Ave-S)

Khamiis, 21ka Nofeembar

Colin Powell Center
[2924 4th Avenue South](https://www.colinpowellcenter.com/2924-4th-Avenue-South)

Labada bandhigba waxaa la smeynayaa 6 - 8 fiidnimo iyada oo bandhigu bailaabanayo 6:30 maqribnimo. Waxaa la soo bandhigayaa waxyaabaha aasaaska ah ee lagu ogaaday daraasadda oo ay ka mid yihiin kharashka, waxyaabaha ay fili karaan dadka gaadiidka raaca, iyo isbedelka xilliga isu socodka. In aad ka qeyb qaadataan waa mid aad muhim u ah waxaanan dooneynaa in dadweynuhu ay ra'yigooda ka dhiibtaan sadexda fikaradood ee la soo jeediyey la tixgelinayo oo si faahfaahsan loogu sameeyo naqshad, injineeriyad iyo dhisid. Labada goob ee bandhigga lagu sameyano way kooban tahay meelaha gaadiidka la dhigto fadlan ku talo gal in aad u soo lugeysaan, bushkuleeti ku timaadaan ama aad gaadiidka dadweynaha soo raacdaan.

Fadlan soo booqo bogga internetka ee www.midtowntransitway.org, si aad uga heshaan macluumaad dheeraad ah.



Sidee ayaan xogogaal u nogon karaa iyo sidaa ayaan lug ugu yeelan karaa?

- Tag guriga furan
- Booqo bogga internetka: www.midtowntransitway.org
- Nagala soco Facebook: www.facebook.com/metrotransitm
- Ama nagala soco Twitter: [@metrotransitm](https://twitter.com/metrotransitm)
- Ha lagu soo diro email ku saabsan wararkii ugu dambeeyay: midtown@metrotransit.org



Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah:

Michael Mechtenberg
midtown@metrotransit.org
612-349-7793